KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

**Sanadka I** — Muqdisho, Tr. 12 Dicembre 1973 — **L. 24**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 15 Tr. 26 Otttobre 1973 — *Cafis Guud.* Bog. 445

SHARCI L. 16 Tr. 26 Novembre 1973 — *Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha.* » 446

SHARCI L. 17 Tr. 29 Novembre 1973 — *Gaanuun idaari ah oo ku saabsan Garsoraysha.* » 448

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 12 Luglio 1973, L. 116 — *Bedelaad Garsore.* » 449

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 26 Novembre 1973, L. 117 — *Magacaabid Xubnaha Guddiga Dallacadda Shaqaalaha.* » 450

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 7 Novembre 1973, L. 118 — *Hanti wareeg guri uu leeyahay Jaalle Suleman Cali Maxamed Bin Qure ku yaal Muqdisho X. Bondere.* » 451

Madbacadda Dowladda — Muqdisho

# BOGGA SEDEEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle *Cabdullahi Shiewa Roble. L. (21))* Bog. 452

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle *Cali Ismacil Cilmi. L. (202)* » 452

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle *Shamsa Xaji Farax. L. (203)* » 453

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Cabdulqadir Aden iyo Cabdullahi Warsama Xassan. L. (204)* » 453

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Cali Diriye iyo Cabdulqadir S. Cabdalla. L. (205)* » 454

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Moxamed Aden Cali. L. (206)* » 454

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Moxamed Aden Sabrie. L. (207)* » 455

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Moxamed Axmed Moxamed Addan. L. (208)* » 455

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Moxamed Cismacil Ibrahim. L. (209)* » 456

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Ogeysiis Baddalaad Dhul Jaalle *Barre Yusuf L. (210)* » 456

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHOBA, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle *Ibrahim Maclim Muse. L. (211)* » 457

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHOBA, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle*Naji Salex Abuubakar. L. (212)* » 457

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHOBA, Ogeysiis Naada Dhul *Xaji Moxamed Gurac. L. (213)* » 458

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHOBA, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle *Sharif Nur Moxamed Cabduraxman L. (214)* » 458

GUDDOOMIYAHA DEGMADA KISIMAYO, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle*Xalima Shekh Maxamud. L. (215)* » 459

GUDDOOMIYAHA DEGMADA MARKA, Ogeysiis Naada Dhul Jaalle Fratelli *Leandri Leandro iyo Jovanni. L. (216)* » 459

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, Ogeysiis Dhumid Buugga L. 746, *Xasan Axmed Cali. L. (217)* » 460

MAXKAMADDA GOBOLKA KISIMAYO, Ogeysiis Dhumid *Assegno Bankario L. 011983, leyahay Jaalle Cadda Iikar Isman. L. (218)* » 461

# BOOGA KOOWAAD
# SHARCI

**SHARCI L. 15 Tr. 26 Oktobar 1973.**

**Cafis Guud.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. 1aad ee 21 Oktobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. 13 ee 25 Oktobar 1973 ee khuseeya cafis-Guud iyo cafis Gaareed;

MARKUU ARKAY Go'aankii ay isku raaceen G.S.K. iyo Golaha Xoghayaasha;

WUXU GARTAY In sharciga lamb. 13 in loo bedelo sida soo socota:

Qodobka 1aad

Ma gelaayaan cafis Guud (amnistia) dunuubta aan weli la qaadin uu dhigayo Xeerka Ciqaabta Ciidammada Nabada qodobadiisa 132, 133, 134, 157, 170 iyo 173.

Dunuubta kor ku tilmaaman ay Maxkamadaha Ciidammadu ay Go' aan ka gaareen 21 Oiitobar 1973 ka hor waxay gelayaan cafis Gaareed (indulto).

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 21 Oktobar 1973 waxaana lagu sii saaraya faafinta rasmiga ee Dawladda.

Muqdisro, 26-10-1973.

*Jaalle S. Gas Maxamed Siyad Barre*
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

SHARCIGA L. 16 Tr. 26 Novembre 1973.
Wax ka Beddelid Sharciga Shaqaalaha.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshida 1aad iyo 2aad ee Kacaanka Oktobar, 1969;

ISAGA OO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 29 soona baxay 1dii Abrile, 1970 iyo wixii dambe oo iskabeddelay, kuna saabsan Shaqaalaha Dawladda;

ISAGA OO AGOONSADAY Inay lagama maarmaan tahay in la dhiso Guddi Dallacaada Shaqaalaha;

MARKU ARKAN Ogolaanshaha Golaha Sare ee Kacaanka (fiiri GSK-77-D-6982 ee 6dii Agosto 1973);

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la beddelay Qodobka 35 ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda tiradiisuna tahay 29 ee soo baxay 1dii Abrile 1970.

Qodobka 2aad

Waxaa la dhisay Guddi oo xubnaha (Members) ay ka kooban tahay lagu soo sheegi doono Xeer uu Jaalle Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka soo saaro.

Qodobka 3aad

*Shaqada Guddida*

Guddida shaqadiisu waxay tahay iney si cadaalad ah u baaraan in dadka loo soo qoray dallacaad, ay dallacaadaas xaq u leeyihiin iyo waxay dallacaadaas ku muteysteen. Waxyaalaha ay Guddidu arridu arrintaas ku hubsanayaan waxaa ay yihiin:

a) Werinta (Report) ku saabsan qofka ee sannadkii, werin gaar ahaaneed haddii uu qofka joogay saddex bilood wax ka badan Wasaaraddaas ama Wakaaladdas.

b) Guddiga wuxuu kalo tixgelin doona werinta (Report) qofka ee Taliska Ciidammada Nabad Sugga Somaliyeed (N.S.S.).

c) Xiriirka qofku la leeyahay Xafiiska Siyaadda ee Xafadda (Golaha Hannuuninta Dadweynha).

g) Werinta qofka oo xagga Laanta Baarista Dembiyada (C.I.D.) iyo wax allaale wixii kale oo ay isyiraahdaan waxbaa lagaga ogaan karayaa arrintaas.

x) Guddigu marku soo qabto waxyaalahaas aan kor ku soo sheegnay, wuxuu u gudbin doonaa go'aankiisa Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

Madaxweynuhu asagoo, tixgelin doona taladaas Guddiga waxaa loo ogolaan doona qof kasta oo shaqaale ahi, asagoo loo fiirin doono tawrinimadiisa, waxtarnimadiisa xagga shaqada, heerka Tacliintiisa ay joogto waddaninimadiisa iyo dadnimadiisa guud ahaaneed, inuu helo horukac.

## Qodobka 4aad

Guddiga kor lagu soo magacaabay oo ahaan doona fadhigiisu Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuu hawl ku lahaan doonaa shaqaalaha Dawladda Guud ahaan, ayna ka mid yihiin Wakaaladda madax haddi laga reebo Ciidammadda Qalabka sida.

## Qodobka 5aad

Waxaa la baa, biyey sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon sharcigan.

## Qodobka 6aad

*Hirgelin*

Sharcigani wuxuu hirgelayaa marka laga bilaabo 6dii Agosto 1973 waxaana lagu dhigi doona Faafinta Rasmiga ah ee waladda.

Muqdisho, 26-11-1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 17 Tr. 29 Novembre 1973.

Qaanuun idaari ah oo ku saabsan garsoorayaasha.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGA OO ARKAY Sharciyada tirsigoodu yahay 3 iyo 70 oo soo baxay 21kii Juunyo 1962 iyo 1dii Nofember 1972 kuna saabsanaa Qaanuunka Garsoorayaasha (Ordinamento Giudiziario) iyo isbeddelkii ku dhacay;

ISAGA OO TIX GELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Warqadda ku lifaaqan (Annex 1) Qaanuunka Garsoorayaasha tirsigiisuna yahay 11 ee 30kii Nofembre 1963 iyo iian tiradiisu tahay 29 ee 28kii Disembre 1963 waa lagu dhaqan gelayaa inta qaanuun cusub la soo saarayo oo beddelaaya dhismaha (Establishment) waaxda Garsoorka iyadoo la fulinaayo Xeerka tiradiisu tahay 70 ee 1dii Nofembre 1972.

Sharcigani wuxuu la dhaqan gelayaa Gaanuunka tiradiisu tahay 70 ee 1dii Nofembre 1972, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Nofembre 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
12 Luglio 1973, L. 116.
Bedellaad Garsoore.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;
MARKU ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 1 ee 25kii Oktobar 1969;
MARKU ARKAY Dikrii tiro 12 ee 25kii Oktobar 1969 ee Golaha Sare ee Kacaanka;
MARKU ARKAY Dkirii sharciyeed tiro 3 ee 12kii Juun 1962, sharciga nidaamka Maxamadaha iyo Beddelaadihii lagu semeeyey;
MARKU ARKAY Sharciga shaqaalaha Dawuladda ee madeniga ah;
GOORTII ay noqotay laga maarmaan in Garsoore Cabduraxman Xusen Samantar uu jooga magaalada Kismaayo;
MARKU DHAGEYSTY talada Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

DIKRIIS:

Qodobka 1aad

In Garsoorayaasha hoos magacaaban loo beddela Xafiisyada mid waliba magaciisa ku ag qoran:

1) Jaalle Cabduraxman Xusen Samantar — Guddoonshaha Maxkamadda Rafcaanka ee Jiubada hoose;
2) Jaalle Yaasiin Xaaji Xusen — Guddoonshaha Maxkamadda Rafcaanka ee Hiran.

Qodobka 2aad

Dikriigani waxaa lagu soo saari doonaa xaashida rasmiga ah, wuxuuna leeyahay dhaqan deg-deg ah.

Muqdisho, 12-7-1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle Dr. Cabdisalan Sh. Xusen*
Xoghayaha Wasaaradda iyo Diinta
*Jaalle Dr. Maxamed Yusuf Weyrax*
Xoghayaha Wasaaradda Lacagta

*VISTO e registrato - Reg. n. 3, foglio n. 243.*
*Mogadiscio, li 29 Ottobre 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. CABDULLAHI WARSAME NUR

# BOGGA LABAAD

## XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

26 Novembre 1973, L. 117.

Magacaabid xubnaha gudiga dallacaadda Shaqaalaha.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshidii 1aad ee soo baxday 21kii Oktobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga shaqaalaha Dawladda tiradiisuna tahay 2) ee soo baxay 1dii Abrile 1970, iyo isbeddelkii ku dhacay;

ISAGOO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka bishii Agosto 6dii 1973.

Qodobka 1aad

Jaallayaasha oo magacyadoodu hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay inay ka koobnaadaan Guddida Dallacaada Shaqaalaha, waxay kala yihiin:

1. — Jaalle Gaashanle Sare Maxamuud Geelle Yusuf oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka — Guddoomiye

2. — Jaalle Gaashanle Dhexe Maxamed Yusuf Cilmi oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka — Xubin

3. — Jaalle Gaashanle Dhexe Cabdulqaadir Xaaji Maxamed oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka — Xubin

4. — Jaalle Maxamuud Xusen Cigaal, Agaasimaha ku meel gaadhka ah Shaqaalaha Xafiiska Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka — Xoghaye

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelaya marka laga billaabo bishii Agosto 6dii 1973 waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26-11-1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

7 Novembre 1973, L. 118.

Hanti wareeg guri uu leeyahay Jaalle Suleman Cali Maxamed Bin Quer — ku yaal Muqdisho — Xafadda Bondhere.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

QAYBTA DHISMAHA IYO DHULKA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddaha lamb. yahiin MPT-CM-52-Bs-2882 iyo MPT-CM-52-Bs-3217 ee taarikhadooda yihiin 12-8-1973 iyo 7-9-1973 ee no soo qortay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta oo ya ku weydiisaneyso in loo qiimeyo guriga uu leyahay Jaalle kor ku magacaaban;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku saabsan qiimaha gurigaasi ayna farsammeyeen niman oo ka shaqeeya Waaxda Gorsheynta iyo Hindisaha ee ka tiirsan Wasaaradda Hawlaha Guud taarikhdeeduna tahay 8-8-1973;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 1480 Rep. taarikhdeeduna aheyd 21 Agosto 1973, oo lagu qoray buuga Canshurta L. 358 ee Xafiiska Canshuurta L. 20, eena lagu dhigay Xafiiska Notayaha Dr. Maxamed Xasan Jasti, oo ku saabsan kala gadasho guri dhisan oo daar ah, laga gaday Cali Nur Maxamed oo ka gatay Suleman Cali Maxamed Bin Quer kuna yaal Muqdisho — Xafadda Bondhere — dhulka la mid ah mq. 525;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in loga qaaday Dan Guud ahaneed guri uu leyahay Jaalle Suleman Cali Maxamed Bin Quer iyado la siinayo magdhaw qiimahii gareyso Sh. So. 70.524, lacagta iyada ah waxaa ka go'aya 15% oo dhan Sh. So. 10.578,60 sida ay mujineyso (Preventiva) ee Jaalle Suleman Cali Maxamed Bin Quer waxaa u soo heraysaa lacag ku fadhiya Sh. So. 59.945,40 iyado ay ku jirin qiimaha dhulka, lacagta waxaa lagu bixiinkara Amar — Xeer uu saxixo Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda.

Muqdisho, 7 Novembre 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.
*W. S. Gaashanle Sare M. S. CUSMAAN*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1 foglio n. 53.*
*Mogadiscio, li 11 Novembre 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cbadullahi Shirua Roble, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 24-10-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg 20x20, kuna fadhiya 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul L. 26; Koofur Jid; Galbeed dhul L.31; Bari dhul L. 33.

Qofkii dannayanyaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 1 Novembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(201)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ismaacil Cilmi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-6-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda, oo leh qiyaas 4 gees isle'eg 20x20, kuna fadhiya 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 43; Galbeed dhul L. 36; Bari dhul L. 38.

Qofkii dannayanyaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 4 Novembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(202)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shamsa Xaaji Farah, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 18-8-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, g leh qiyaas 4 gees isle'eg, kuna fadhiya 20x20 = 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul L. 27; Koofur Jid; Galbeed Dhul L. 32; Bari Dhul L. 34.

Qofkii dannayanyaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Novembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(203)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul ay leeyihiin Jaalle Cabdulqaadir Aden iyo Cabdullahi Warsama Xasan — T . G. 641-59 ku yaal Muqdisho xafadda Xaaji Rabajab.*

Jaalliyasha kor ku magacaaban ee horay loo naadshay dhul ku fadhiyay 560 mdh. ee laguna soo diray warqadda tiradeedu aheed 932532 ee 5-6-1966.

Waxaa la caddeynayaa dhulka isaga ah, waxuu dhanyahay mt. 38, 8x15 la mid ah 601,40 mdh. ee aan aheen sidii hore aanu kor ku soo sheeknay, sohdimahiisuna waa sadii hore.

Muqdisho,

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(204)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul ay leeyihiin Jaalle Cali Diriye iyo Cabdulqaadir Sheekh Cabdalla ku yaal Muqdisho — xafadda Xamar Weyn — T. G. 1067-60.*

Jaalliyaasha kor ku magacaaban, oo haray loo naadshay dhul ku fadhiyey 500 mdh., waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga ah waxuu dhanyahay 387,50 mdh. ee aan ahayn sidii hore ee kor anuu ku sheegnay, shodimahiisuna waa sadii hore.

Muqdisho, 15-11-1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(205)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamuud Aden Cali, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Wardhigley — T. G. N. 805-68.*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Wardhigley, kuna fadhiya 1.200 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 805-1083-68 ee 3 Luglio 1968, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiya 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 654 iyo 655; Galbeed dhul L. 650; Bari dhul L.647.

Muqdisho,

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(206)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddallaad naado dhul u leeyahay Jaalle Moxamed Aaden Sabriye — T. G. 1834-61, ku yaal Muqdisho xafadda Hodan.*

Jaallaha kor magacaaban, oo horay loo, naadshay dhul ku fadhiyey 364,50 mdh., waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga ah waxuu dhany-ahay mt. 30x13,5 lam id 405 mdh. ee aanu ahayn sidii hore ee aanuu kor ku sheegnay, sohdimahisuma waa sadi hore.

Muqdiho,

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cagi Saciid*

*(207)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamuud Axmed Moxamed Addan kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis — T. G. 756-62.*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho xafadda kasa Bobolare, kuna fadhiyey 1800 mdh, waxaa la caddeynayaa in looga qaaday dan guud ahaneed.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqadda tiradeedu aheed 548403 ee 14-11-1962, waxaay iska baddashay sida soo socota.

Dhulka cusubi waxuu ku yaal Muqdisho, xafadda Shibis, waxuuna leeyahay qiyaas mt. 29,5x9,8 oo ku fadhiya 289,10 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi dhul dhisan oo dad leeyihiin;

Koofur Jid;

Galbeed dhul dhisan;

Bari Jidka Juba.

Muqdisho,

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(208)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Cismail Ibrahim, kuna yaal Muqdisho, Xafadda wadada Afgoys — T. G. N. 907-67.*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, Xafadda Afgoye, kuno fedhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahay MWD-907-1167-63 ee 307-1968, waxay isku baddashay sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, Xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rectangular 30x20, oo ku fadhiya 30x20 = 600 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Dhul L. 561; Koofur Jid; Galbeed Dhul L. 598; Bari Dhul L. 600.

Muqdisho,

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(209)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Barre Yusuf ku yaal Muqdisho degmada Xamar Jeb Jeb — T. G. 641-59.*

Jaallaha ujeeddadu ku magacaaban ee horay loo naadashay dhul ku fadhiya 1350 mdh. ee laguna soo diray warqadda tiradeedu aheed 101522 ee 27-5-1960.

Waxaa la caddeynayaa in dhulka isaga ah waxuu dhanyahay 685,40 mdh. ee aan ahayn sadii hore ee kor aanuu kusheegnay.

Waqooyi waxaa ka higaa Cabdi Moxamed Warfa'; Koofur Waxaa ka higaa Jid; Galbeed waxaa ka higaa waddada la yirado Tanzanya; Bari waxaa ka higaa Xaaji Aamed.

Muqdisho, 17 Novembre 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Saciid*

*(210)*

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibrahim Malim Muse u soo qortay arji Xafiska Guddomiyaha Degmada Baydhabo maalinta bisha ahayd 16 Mayo 1964 oo ku weydistay dhul dawladded ku yaal Baybhabo ku fadhiya 330 mdh., Sohdimo:

Waqaaye waxaa ka xiga Jid;
Bari waxaa ka xiga Guriga Jaalle Bashow Adan;
Galbeed waxaa ka xiga Strubutore;
Konfur waxaa ka xiga Jid.

Qofkii dannaynayaa waxuu si fiican ugu arki karaa naqshada dhul oo laga helo Xafiiska Guddomiyaha, dhulka waxaa laga doodi kara muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo ka bilaabata maalintii lagu dhejiyey looxa iyo maalintii lagu dhigo xaashida rasmiga ah ee dawladdu.

Baydhabo, 16 Mayo 1964.

*(211)*

---

GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in ou keenay Xafiiska Guddomiyaha Degmaad arji maalinta 14 Agosto 1965 Jaalle Naaji Salax Abuubakar ou ku weydisannaayo in loo ogolaado cad dhul ou dhisto si qaanuun ah Garbada, oona laga ognakaro haddii la doono naqshada dhulka (planimetria) oo laga helo Xafiiska Degmada Baydhabo.

Waxaay dheganandoonta nadada 30 maalmood si ou ku dacwoodo nin dan ou jirto.

Baidhabo, li 6 Nofember 1973.

GUDDOMIYAHA DEGMADA
Saxiixa lama aqrinkaro

*(212)*

## GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Moxamed Gurao u soo qortay arji Guddomiyaha Degmada Baydhabo tarikhida Markay Aheed 30-6-1964 uu ku weydisanaayo dhul dismo ku na yaal Baydhaba xafadda Jidka Hamar — Baydhabo ku na fadhiya 764,50 mdh.

Waqooye: waxaa ka Jira Jid;
Bari: waxaa ka jira guriga Jaalle Cali Shekh Ibrahim;
Galbeed: waxaa ka xiga Jid Yar;
Konfur: waxaa ka jira guriga Jaalle Faduma Cabdi ee Cali Moxamed.

Qofkii doonaya wuxuu si fiican uga arki kara waqshada dhulka oo taal xafiiska Guddomiyaha Guddiga Degmada Baydhabo, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) malmood, oo laga billaba manta lagu naajiyay derbiyadda, naadadda lagu dhejiyo arrimaha ka soo baxa dowladda, meelaha oo ah xafiiska Guddomiyaha Guddiga Degmada Baydhabo iyo xafiiskii hore ee baldiyadda.

Baydhabo, 15-11-1966.

Guddonshaha Guddiga Degmada Baydhabo
(213) *Abanur Ali Moxamed*

---

## GUDDOOMIYAHA DEGMADA BAYDHABA

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sharif Nur Moxamed Cabduraxman in u soo warsaday dhul ku yaal degmada Baydhaba oo lex qiyaas rektangular mt. 3,45x5 kuna fadhiya 17,25 mdh.

SOHDIN:

Wagoye: waxaa ka xiga Sharif Naasir;
Konfur: waxaa ka xiga Jid;
Galbeet: waxaa ka xiga guriga Omar Saciid Jabiri;
Bari: waxaa ka xiga Jid.

Guddomiyaha Degmada Baydhabo
(214) *Warsame Kulmie Guled*

GUDDOMIYAHA GUDDIGA DEGMADA KISIMAYO

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xalima Shekh Mohamuud ayu soo qortay arji xafiiska Guddomiyaha degmada Kisimayo maalinta bisha aheed 30-9-1965 ay ku weydiisatay dhul dawladeed ku yaal Kisimayo mt. 16x16 ku fadhiya 256 mdh., sohdin:

Qorrax ka soo bax Jid;
Qorrax u dhac Moxamed Munge;
Waqooye Xussen Ungandayni;
Koofuf Xalima Shekh Moxamud.

Qofkii dannaynayaa waxuu si fican ugu arki kara naqshada dhul oo tal xafiiska Guddomiyaha, dhulkaa waxaa laga doodi kara muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo ka bilaabata maalintii lagu dhejiyey looxa iyo maalintii lagu dhigo xaashida rasmiga ah eedawladdu.

Kisimayo, 16-5-1968.

Guddomiyaha Guddiga Baidhaba
*(215)* *Muusa Faarax Saciid*

GUDDOMIYAHA DEGMADA MARKA

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Fratelli Leandri Leandro iyo Jovanni, in ay soo weydiisteen dhul dawladdeed ku yaal degmada Shalambood tarikhda markay aheed 22-1-1962, oo leh qiyaas mt. 72x60 kuna fadhiya 4320 mdh.

SOHDIMO:

Waqooye dhul dawldeed;
Koonfur wadada Muqdisho iyo mida Marka;
Galbeed ceelka dawladda Hoose Marka;
Bari waddo;

Marka, 3-3-1962.

Guddomiyaha Degmada Marka
*(216)* *Cali Moxamed Cusuble*

MAXKAMADDA GOBOLKA EE HARGEYSA

Arji. Qub. 1-73

XASAN AXMED CALI — Arjileh
IYO
Bankiga Kaydka iyo Amaahda Somaliyeed — Doodceliye Hargeysa

DECREE

XASAN AXMED CALI waxa u hor yimi Garsoore Dr. Isaxaaq Xaji Warsame isaga oo ah ninka haystay Buugga ee Lambarkiisu yahay 746 kuna jirtay Lacag dhan Sh. So. 12.255,35 (Laba iyo toban kun laba boqol iyo shan iyo konton). Waxaanu i tusay warqaddii Maamullaha Bankiga Kaydka iyo Amaahda Somaliyeed ee laanta Hargeisa u ku cadeeyay in Buuggasi ka lumay.

Waxaan halkan ku bixinaya Amarka Aniga oo Cuskanaya Qodobka 27 ee Decree Lamb. 2 ee 9kii Sebt. 1965, Buuga Kaydka iyo Amahda in la baabi iyo.

Waxaan Amar ku bixinaya (A) in lagu qoro xeer sheegtada Dawladda (B) Lacagta ah 12.255,35 Bankigu u celiyo XASAN AXMED CALI, Arjilaha 30 Casho Dabadeed marka lagu qoro xeer sheegtada Dawladda.

Ka soo baxday Gacanteyda iyo Shaabada Maxkamadda manta 7dii

November 1973.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Hargeysa
(217) *Dr. Isaxaaq Xaji Warsaama*

## MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

### HADDAAN ARKAY AMA AKHRIYEY DACWADDAN

MARKAAN ARKAY waxay ku saabsantahay ogeysiisyii Bankiga Ganacsiga Soomalida laanta Kismayo ee aan ogaaday in ay tahay Shaqada Xafiiskan, markan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 L. 2;

WAXAAN CADDEEYNAYAA DHUMIDA Assegno Bankariyo L. 011983 Shilin 2.000-/ (lambkun Shs. Keliya).

WAXAA LA AMRAYAA in loo cusbooneysiyo Jeeg uu ka dhumay CADDA IIKAR CISMAN muddo 15 (shaniyotobaanberi) ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Bollettino Ufficiale haddan la helin qof kale ooJeegaas sheegta.

WAXAA KALOO la caddeeynayaa in Jeega gacanta laga saaro ninka kor qoan ama kale oo ka sita Wakaalad aan shaki hirin.

Kismayo, 19 Nofembre 1973.

Kusime Guddoomiyayha Maxk. G. J. Hoose
*Dr. Axmed Ibrahim Moxamed*

*(218)*